



County of San Diego

DEPARTMENT OF ENVIRONMENTAL HEALTH AND QUALITY

P.O. BOX 129261, SAN DIEGO, CA 92112-9261
Lambarka telefoonka: (858) 505-6900 | Fakiska: (858) 999-8920 | www.sdcdehq.org

MACLUUMAADKA KOOBAN EE IIBKA CUNTOOYINKA GURIGA LAGU SAMEEYO (MEHKO)

Iibka Cuntooyinka Guriga Lagu sameeyo (MEHKO) waa nooc kamid ah adeega cuntada, sida makhaayada yar, kaas oo uu ay ka shaqeeyaan dadka deggan guri gaar ah halkaas oo cuntada lagu kaydiyo, lagu sameeyo, laguna diyaariyo ka dibna loo geeyo macaamiisha. Hoos waxaa ku qoran macluumaad kooban oo ku saabsan shuruudaha MEHKO, xadidaadaha, iyo tiaaabooyinka loo baahan yahay si loo bilaabo MEHKO ee gudaha Degmada San Diego.



Shuruudaha MEHKO

- Waa in la helaa ogolaanshaha ay bixiso Waaxda Caafimaadka Deegaanka & Tayada ka hor inta aan la hawlgelin MEHKO.
- **Hal** shaqaale cunto oo waqti-buuxa shaqeeyo, (oo aysan ku jirin xubin qoyska ama xubin guriga ka tirsan) ayaa laga yaabaa inuu ka shaqeeyo MEHKO.
- Hawl-wadeenka MEHKO waa in uu si guul leh uga gudbaa imtixaan la aqoonsan yahay ee maamulaha badqabka cuntada. Sidoo kale, qof kasta (dadka) qaybta ka ah MEHKO waa inay dhammaystiraan tababarka maamulidda cuntada.
- Cuntada waa in la diyaariyaa, la kariyaa, oo la bixiyaa isla maalintaas.
- Dadku waxay wax ku cuni karaan gurigaaga, waa ay qaadan karaan, ama cuntadooda waa loo geyn karaa.
- Noocyada cuntada ee la diyaarin karo waxaa ka mid ah noocyo badan oo noocyo kala duwan sida ka muuqato liinka cunada makhaayada.

Xaddidaadah MEHKO

- Kaliya **hal** MEHKO ayaa loo ogolaan karaa guri kasta oo deegaan ah. Tani waa inay ahaataa meesha uu deganyahay hawl-wadeenka MEHKO.
- Waxay cuntadu la diyaarinayo ku kooban tahay ugu badnaan 30 cunto maalintii ama 90 cunto todobaadkii. Haddii aad ku shaqaynayso gaadhi wareega oo la oggol yahay ee MEHKO, ugu badnaan waa 80 cunto maalintii ama 200 oo cunto toddobaadkii.
- Iibka guud ee sanadlaha waxa lagu qiyaasaa \$100,000 sanadkiiba marka loo eego Tasmada Qiimaha Macmiilka ee California. Haddii aad ku shaqaynayso gaadhiga cunnada wareega la oggol yahay ee MEHKO, wadarta guud ee iibka sannadlaha ahi waxa uu kordhaya ilaa \$150,000.
- Lama ogola calaamad xayasiin ah ama boodhadha kale oo xayaysiis ah.
- Cunnada MEHKO laguma iibin karo xaruun kale ee cuntada lagu iibiyo oo MEHKO kuma shaqayn karto sidii Hawl-wadeenka iibka cunnada fudud.
- Kaliya shaqaalaha MEHKO, ama xubin qoyska ka mid ah, ayaa cunto u geyn kara macaamilka.
- Waxay laga yaaba in MEHKOs aysan soo saarin, u adeegin, ama isticmaalin caanaha aan la kululayn, ama lohodka ceeriinka ah ama cunto kasta oo u baahan qorshaha HACCP/habraaca gaarka ah..
- MEHKO-da rabta inay u isticmaasho gurigooda hawlaha diyaarinta cunnada gudaha gaadhi cunnada ee wareega ee la ogolyahay ayaa sidaas samayn karaan kaliya kadib markay ogolaansho ka helaan waaxdan.

Sida loo Furo MEHKO

- 1) U soo gudbi waxdeena waxa soo socda si ay dib u eegis ugu sameeyaan: **a)** Codsiga Ogolaanshaha Caafimaadka Xarunta Cuntada, **b)** Foomka Heerka Habka Hawlgelinta, **c)** Liiska Cunnada ee la soo jeediyay, **d)** Shahaadada Badqabka Cuntada, iyo **e)** Natiijooyinka baadhista biyaha ceelka (haddii ceel gaar loo leeyahay).
- 2) Marka dhamaan dhukumiintiyada kor ku xusan ay dib u eegaan oo ay ansixiyaan waaxdan, oo la bixiyo lacagta khidmadaha oggolaanshaha, Ogolaanshaha Caafimaadka ee lagu shaqeynayo MEHKO ayaa la bixin doonaa
- 3) Baaritan ku aadan jikada gurigaaga ayaa samayn doona waana in la dhammeeyaa ka hor inta aanad bilaabin hawlgalka MEHKO. Waxaa shahaadada Ogolaanshahaaga caafimaad lagu keenayaa inta lagu jiro kormeerkan hore.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo websaydka Waaxda Caafimaadka Deegaanka & Tayada ee www.sdcdehq.org or iimayk noogu soo dir fhdmehko@sdcounty.ca.gov.